


Xildhibaan C/raxmaan C/Shukuur oo Isu Sharaxay Madaxweyne

MURASHAXA MA MADAXWEYNENIMADA SOMALIYA

Xaflad ballaaran oo lagu taageeray Murashaxa madaxtinimada Wasiirkii hore ee qorsheynta Xildhibaan C/raxmaan C/Shukuur ayaa manta ka dhacday Hotel Saxafi ee magaalada Muqdisho.



Xafladaan oo si heer sare ah loo agaasimay ayaa waxaa si weyn uga qeyb galay dad matalayey qeybaha ka la duwan ee bulshada oo ay hor kacayeen Ugaasyo, salaadiin, cuqaal, Siyaasiyiin, Xildhibaanno, culumaaudiin dhalinyaro iyo haween boqolaal gaarayey. Jufada Ceyr ee Habar gidir oo iyadu sameysay xafladda kuna casuuntay beetweyn taageera buuxda oo aan waxba lala kala harin la siiyo murashaxa ay beeshu la dooneyso xilka madaxweynaha Somaliya Xildhibaan

C/raxmaan C/shakuur oo ay sheegeen iney la noqotay inuu dalka iyo dadka somaliyeed ka samata bixin karo xaaladda adage e lagu jiro

Ugaas C/Dahir Ugaas Nuur oo hadalka furay ayaa sheegay in Jufadiisu isku afgaratay ka hor inta aysan beelaha kale Somaliyeed hor tegin in ay haboontahay iney marka hore ka codsadaan beesha Habargidir iney u tanaasulaan Murashaxajufadiisu wadato isla markaana la garab istaagaan taageero hiil iyo hooba leh.




“Waan dareensannahay iney jiri karaan dad kale oo ku hamminaya iney iyaguna nasiibkooda tijaabiyaan oo isu sharraxaan xilka madaxtinimada dalka balse waxaa ay nala noqotay in midnimo iyo wada jir iyo isu tanaasul oo keliya guul lagu gaari karo, sidaa darteedna aan howsha ka bilawno marka hore inaan taageeradiina helno si innaga oo wada jirna aan beelaha kale ee Somaliyed ee walaaleheen ah ugu sii gudubno ayuu yiri.



Suldaan Xasan Cilmi Yaxye oo isna madasha ka hadlay ayaa dadkii xafaladda kasoo qeyb galay u sheegay in Cidda Gogosha fidisay isla markaan walaalaha goobta jooga wax ka dooneysaa aysan aheyn shakhsii qura balse ay yihiin umad dhan oo aamintay in danta guud ay ku jirto in la taageero murashaxa ay wadaan.



Waxaa madasha hadallo ka jeediyey, siyaasiyiin, aqoon yahanno iyo wax garad kale oo dhammantood soo dhoweyey murashaxnimada xildhibaanka sheegayna iney wax walba oo ka raankooda ah la garab istaagi doonaan.



Ugu danbeytii waxaa madasha hadal ka jeediye Murashaxa madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliya Xildhibaan C/raxmaan C/shakuur Warsame.

Khudbad socotay muddo 15 daqiiqo ah si weynna loogu sacab tumay ayuu ku billaabay in maadaanma aan weli lagu guuleysan sameynta axsaab siyaasadeed oo aragtii iyo ahdaaf guud salka ku haya ay taasi lagama maarmaan ka dhigeyso in ciddii dooneysa iney u madda u shaqeysa ay marka hore kalsooni ka raadsato hogaamiyayaasha bulshada, sama doonada,salaadiinta, culumaa udiinka iyo guud ahaan bulshaweynta Somaliyeed oo dhan oo in kastoo aysan codeyneyn doorashada soo socota hadana iyagu ah kuwa leh shariiyadda siyaasadda.



C/shakuur ayaa sharraxay sida ay mushkiladda Somaliya haysataa ula muuqato. Labadii tiir ee aasaaska u aheed dowladnimada oo kala ahaa Dalka iyo Diinta ayuu tilmaamay in dhaawac weyn loo geystay ka gadaal markii dantii gaarka aheed la diimeeyey magacii diintana wax lagu dumiyey laguna dilay.

Dalka ayuu ka digay iney halis weyni soo food saartay maadaama qabiil waliba dowlad u gooniya ku dhawaaqay ayna hadda marayaan afartameeyo dowlad ku sheegyo, Waxaa uu ku dooday in tani ay fogeyneyso himailadii dhismaha qaran somaliyeed oo dadka oo dhan ka dhexeeya.

Xildhibaanka oo lagu tilmaamo inuu ka mid yahay siyaasiyiinta fara ku tiriska ah ee aqoon durugsan mar qura u wada leh carabta, galbeedka iyo diinta islamka ayaa si weyn uga soo dhex muuqday masraxa siyaasadda ee Somalia dhowrkii sano ee la soo dhaafay.


Waxaa uu tilmaamay in mushkiladaha manta somaliya ay wajaheysaa aysan aheyn ku wii hore. “Adduunyada waxa ka ka dhacaya is bedello waaweyn oo si loola jaanqaado ay tahay in aan la dhihin maxaa habboon ee la yiraahdo maxaa suurto geli kara si horay loogu dhaqaqo” ayuu yiri.

“Soomaaliya waxay maanta u baahan tahay waa hogaan hiigsi (Vision) leh, Risaalo (mission) iyo hawl qorshayn halbeeg leh ” ayaa hadalladiisii ka mid aheed.

Musuqmaasuqa, eexda iyo danaysiga gaarka ah oo lala dagaalo ayuu farta ku fiiqay in ay tahay tan keliya ee qaran somaliyeed oo taabbo gal ah lagu dhisi karo.

Waxaa uu ku nuuxnuuxsday sida ay lagama maarmaan u tahay in la helo nidaam dowladeed oo hufnaan iyo karti ku dhisan cadaaladna salka ku haya.

“Cadaadaldu waa in cid walba ay heshaa inta uu la egyptian saamigeeda iyo miisankeeda waxqabad. Maraykan iyo Madagashkar waa laba dawladood oo UNka ka wada tirsan laakiin isku miisaan ma ahan” ayuu tusaale ku bixiyey.







Waxaa soo tebiyey:

Yusuf Sheikh

Faafin: SomaliTalk.com | June 11, 2012